

# Hawlaha Qayb ururinta oo Guga Dib loo Bilaabayo

**Goobta Faddarada Ciidda ee Xaafadda South Minneapolis**

Minneapolis, Minnesota

Ogaysiiskii 2aad – Abril 2006

## **Ka jawaabista su'aalihiiina**

Wakiillada federaaliga ah iyo kuwa gobolka ayaa diyaar u ahaan doona in ay degganeyaasha ula kulmaan si fool ka fool ah ama iyagoo koox koox yar yar ah inta la wado hawsha qayb ururinta.

Dhowr kulan ayaa mustaqbalka dhow laga qaban qaabin doonaa xaafadda oo dhan. Kaar la isku diro iyo xayaysiisyo wargeysyada la soo geliyo ayaa ka warbixin doona taariikhaha iyo goobaha kulannadan marka macluumaadka la isu raaco.

## **Wixii goobta ku saabsan**

Goobta shirkadda CMC Heartland Lite Yard waxa ay ku taallaa isgooyiska woqooyi galbeed ee Hiawatha Avenue iyo 28<sup>th</sup> Street Minneapolis, Minn. Guryaha la dego ee goobta ka baxsan waxaa loo yaqaanaa goobta Faddarada Ciidda ee Xaafadda South Minneapolis, ee ku dhexyaalla dhinaca ku haya xaafadda loo yaqaan Xaafadda Phillips.

Laga bilaabo 1938 ilaa 1963 goobta Heartland waxaa laga soo saari jiray sun cayayaan (pesticide) oo ka kooban sunta arsenic. Dadka sharciyan masuul ka ah wasakhda hawada ayaa goobta nadiifinaya iyagoo ay kormeerayso Waaxda Beeraha ee Minnesota. Ka dib markii la ogaaday in ay faddarada sunta Arsenic ku fidday deyrarka guryaha xaafaddaas, MDA caawimo ayay EPA ka codsatay.



Hay'adda Ilaalada Deegaanka ee Maraykanka (U.S Environmental Protection Agency) iyo qandaraasleysaasheeda ayaa jiilaalka oo dhan qorshaynayey marxaladda xigta ee hawlaha soo ururinta qaybaha ciidda iyo hawlaha saarista. Waxaa la filanayaa in hawlaha qayb ururinta dib loo bilaabi doono 15ka bisha May. EPA waxa ay ku tala jirtaa in ay qayb ururin ku samayso deyrarka guryo tiradoodu 3,000 ka badan tahay. Waxaa qorshe ah in la samaysto shan kooxood oo xaafadda ka dhex shaqeeya. Waqtigaas, shaqaalaha Waaxda Beeraha ee Minnesota (Minnesota Department of Agriculture) ayaa albaabada u garaaci doona degganeyaasha siinna doona warqad gelitaan (access letter) iyo warbixin ku saabsan waxa ay kooxda qayb ururinta samayn doonaan. Ka bacdina kooxdu ciidda deyrarka ayay qayb ka soo ururin doonaan. Degganeyaashu uma baahna in ay guriga joogaan marka qayb ururinta la samaynayo, wax kharash ahna degganeyaasha kuma hayso ururintan ciidda qaybaheeda.

Isniinta ilaa Jimcaha kooxuhu waxa ay ku tala jiraan in ay shaqeeyaan 8da subaxnimo ilaa 5ta galabnimo. Haddii ay kooxuhu shaqaynayaan Sabtida iyo Axadda, waxa ay bilaabi doonaan 10ka subaxnimo waxayna shaqayn doonaan ilaa 5ta galabnimo. Waxaa la rajaynayaa in ay hawsha qayb ururinta qaadato qiyaas ahaan 40 maalmood, haddii ay hawadu noo fasaxdo.

Waxaa gudaha ku jirta kharidadda sakadaha ay EPA ku tala jirto in ay qayb ka soo ururiso marxaladdan gudaheeda. EPA waxa ay sii waddaa in ay dhammaystirto qorshooyinka qayb ururinta. Haddii isbeddel weyn qorshaha lagu sameeyo degganeyaasha waa lala socodsii doonaa.

## **Hawlaha saarista waa la sii wadi doonaa**

Sida ku qeexan *Ogaysiiskii (Update)* ugu dambeeyey, natiijooyinka qayb ururinta ka soo baxay ayaa si cad u tilmaamay 61 guri oo heerka faddarada ee sunta arsenic ee ciiddoodu uu kor u dhaafay 95 qaybood halkii milyan. EPA waxa ay guryaha ka saaraysay ciidda heerka faddaradeedu kaas kor u dhaafay. Soddon guryood oo kuwaas ka tirsan waxaa la nadiifiyey 2004tii iyo gugii 2005tii 27 kalena waxaa la nadiifiyey dayrtii ugu dambaysay. Afarta guri ee hartayna waxaa la nadiifin doonaa guban.

## **La tashiga Bulshada**

EPA waxa ay sii waddaa hawlaha ay bulshada kula socodsiiyayso uguna sheegayso waxa ka dhacaya xaafadda South Minneapolis ee la xiriira nadiifinta faddarada sunta arsenic. Kulan shacabka u furan ayaa la qabtay bishii Noofembar ee tagtay mid kale ayaana lagu tala jiraa in May la qabto. Inta la wado hawlaha qayb ururinta, shaqaalaha EPA waxa ay qaban doonaan fadhiyo warbixineed waxayna diyaar u ahaan doonaan in ay ka jawaabaan su'aalaha ay degganeyaashu qabaan.

EPA waxay weliba sii wadi doontaa in ay wixii cusub kugula socodsiiyo ogaysiisyo dheeraad ah oo sida kan ah. Xaashi luqadda lagu dooran karo ayaa la socday *Ogaysiiskii* ugu dambeeyey mid kale ayaa kanna ku jira. Fadlan buuxi foomkan una soo celi Cheryl Allen adigoo ugu soo diraya cinwaanka ku xusan bogga ugu dambeeya.

## **Su'aalaha badi la isweydiyo**

EPA waxaa weli degganeyaasha uga yimaadda su'aalo badan oo isla siman markaas halkan ayaannu qaarkood kaga jawaabi doonnaa.

## **Miyaad qayb ururinta horta ku samayn doontaan guryaha ay carruuri joogto?**

Waxaannu weli meel dhigaynaa qorshooyinka qayb ururinta ee marxaladda xigta ee shaqada goobta laga qabanayo. Hawshaas qorshaynta waxaa qayb ka ah in aannu tixgelinno codsiga ah in horta qayb ururinta lagu sameeyo guryaha carruurta joogto. Haddii ay hawsha qayb ururintu qaadan lahayd dhowr xilli waxaannu markaas ka fikiri lahayn in aannu qayb ururinta ahmiyado u kala samayno sida aannu horeba ugu samaynay xarumaha daryeelka carruurta ee maalinta (daycares) ee xaafadda. Hase ahaatee, marka sal laga dhigto qaddarinta ugu horaysa waxaa laga yaabaa in aannu awoodno in aannu dhammaystirno qayb ururinta lagu samaynayo ciidda dhulka ee dayr walba ee ku yaalla xaafadda laga walwal qabo muddo hal ama laba bilood ah gudaheed, sidaas oo aan markaas loogu baahnayn in la sameeyo liis kala saaraya ahmiyadaha. Haddii ay qayb ururinta qaadato in ka badan waqtiga la filanayo, waxaannu ka fikiri karnaa in aannu qayb ururinta ahmiyado u kala samayno. Waxaa dadaalka la wado hakin kara in kooxaha qayb ururinta xaafadda la dhex wareejiyo si ay u baaraan oo keliya guryaha carruuri joogto halkay qayb ururinta ku samayn lahaayeen guryo badan oo isku daba xiga. Sidoo kale, waxaa dhici karta in ay carruurta guurto muddada barnaamijka qayb ururinta ama ay taabtaan ciidda guryaha kale, taasoo markaas dhimaysa faa'iidada laga heli karo liis ahmiyadaha kala sheegaya. Arrimahan oo dhan si fiican ayaannu uga fiirsan doonnaa ka hor inta aanan go'aan kama dambays ah ka gaarin sida qayb ururinta la isugu daba xigsiinayo.

## **Waxaad ka hadasheen heerarka faddarada ee sunta arsenic. Waa maxay macnaha tirooyinka yaana tilmaamaya waxa nabadka leh?**

Marka la eego goobaha Superfund ee la mid ah xaafadda South Minneapolis, EPA ayaa masuul ka ah in ay meel dhigto nidaamyo nadiifin oo goob walba u gaar ah. Hay'addu waxa ay tixgelisaa macluumaadka cilmiyaysan ee diyaarka ah kuna saabsan curiyaha faddarada iyo xaaladda gaar u ah goobta si ay go'aan uga gaarto heerka "nabad" ah. Waxaa baaritaankaas qaybka ah in ay Hay'addu la tashato hay'adaha kale ee goboleed iyo kuwa federaaliga ah. Maraykanka warshadaha badan ciiddiisa dhammaanteed waxaa ku jira kiimikooyin caddad kala duwan ah. Goobtan marka la eego, waxaa la filan karaa in caddadyada dabiiciga ah ee sunta arsenic ee ciiddu ay u dhexeeyaan 5 ilaa 10 qaybood halkii milyan. EPA waxa ay faddarada sunta arsenic wadahadallo kala yeelatay Waaxda Caafimaadka ee Minnesota, MDH, iyo Hay'adda Diiwaangelinta Walxooyinka Sunta ah iyo Cudurrada (Agency for Toxic Substances and Disease Registry).


Iyadoo ay sal u yihiin wadahadalladaas, macluumaad kale oo diyaar ah oo ku saabsan faddarada sunta arsenic iyo hawlaha nadiifinta ee goobaha kale laga fuliyey, EPA waxa ay go'aan ku gaartay in caddadyada sunta arsenic ee ka badan 100 halkii milyan ay halis degdeg ah gelin karaan caafimaadka dadka. EPA barta bilowga hoos ayay weliba u sii dhigtay oo waxa ay ka dhigtay 95 qaybood halkii milyan si ay u sii xaqiijiso in uu nidaamku dadka badbaadinayo. Deyrarka muujiyey caddadyo sunta arsenic oo ka badan 95 qaybood halkii milyan waxa ay EPA ka saartay ama waxay ka saari doontaa cidda faddaraysan. Marxaladda xigtaa ee baarista iyo tirakoobka ee goobtan lagu samaynayo waxaa loo yaqaannaa baaritaanka hagaajiska ah (remedial investigation). Hay'addu waxa ay soo ururin doontaa macluumaadka ku saabsan halista ay sunta arsenic mustaqbalka fog caafimaadka u geysanayso. Macluumaadkaas waxaa lagu soo saari doonaa warbixin ku saabsan qiimaynta halista waxaana loo adeegsan doonaa si goobta loogu diyaariyo nidaam kama dambays ah ee nadiifinta sunta arsenic.

## **Waa maxay sababta ayan wararku ii soo gaarayn?**

EPA si joogto ah ayay u cusboonaysiisaa liiska dadka ay waraaqaha u dirto (mailing list) si ay degganeyaasha wararka u gaarsiiso. Liiskii hore ee waraaqaha waxa uu ku koobnaa guryaha aadka ugu dhow goobta CMC Heartland Lite Yard. Iyadoo sal ka dhiganaysa faallooyinka uga yimid degganeyaasha, EPA waxa ay kordhisay liiskeeda waraaqaha si ay u dabooشو isku soo wareeg ilaa iyo hal mayl marka laga dhaqaaqo goobta, halkaasoo ay ku yaallaan in ka badan 10,000 oo guri. *Ogaysiiskan* waxaa loo diray in ka badan 10,000 oo deggane. Haddii aadan ku jirin liiska waraaqaha, la xiriir Cheryl Allen.

Dadka danaynayaa sida kale ee ay xaaladda wax uga ogaan karaan waa haddii ay akhristaan dukumeentiyada rasmiga ah ee laga fiirsan karo meelaha kaydinta (repositories) ee ku taxan bogga dambe ama booqo Shabaqadda ah: [www.epa.gov/region5/sites/cmcheartland/](http://www.epa.gov/region5/sites/cmcheartland/).

Fursadda kale ee u furan dadka raadinaya warar dheeraad ah waa in ay samaystaan Koox Talosiin Bulsheed (Community Advisory Group). Ururka noocaas CAG ahi waxa uu xubnaha bulshada u diyaarinayaa meel ay ka helaan wararka ugu cusub ee ku saabsan xaaladda hawlaha nadiifinta iyo weliba meel EPA, hay'adaha nidaaminta ee gobolka (state regulatory agencies) iyo dadka kale ee qayb ku leh ay kula wadaagi karaan ra'yiga iyo walwalka ay ka qabaan horusocodka hawsha nadiifinta. Ururka CAG waxaa kaloo uu yahay gole shacab kaasoo dhammaan dadka ay hawshu khusayso ama danaynayaa ay cod ku yeelan karaan si firfircoonna kaga qayb qaadan karaan hawsha la wado. Haddii ay koox degganeyaal ahi ay rabaan in ay samaystaan urur CAG ah, la xiriira Cheryl Allen si aad warar dheeraad ah uga heshaan. Waxaa kaloo aad booqan kartaan Shabaqadda CAG ee EPA oo ah: [www.epa.gov/superfund/tools/cag/index.htm](http://www.epa.gov/superfund/tools/cag/index.htm).



## Si aad warar dheeraad u hesho

Haddii aad rabto warar guud iyo kuwa bulshada la xiriira ee ku saabsan goobta, la soo xiriir Cheryl Allen, isu-duwaha ka qayb-galka bulshada ee EPA (EPA community involvement coordinator). Haddii aad rabto macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan shaqada qayb ururinta iyo nadiifinta, la soo xiriir Tim Prendiville, maamulaha mashruuca hagaajinta ee EPA (EPA remedial project manager).

### Cheryl Allen

Isu-duwaha Ka qayb-galka Bulshada  
(Community Involvement Coordinator)  
(312) 353-6196  
allen.cheryl@epa.gov

### Tim Prendiville

Maamulaha Mashruuca Hagaajista  
(Remedial Project Manager)  
(312) 886-5122  
prendiville.timothy@epa.gov

EPA Region 5 (EPA Degmada 5aad)  
77 W. Jackson Blvd.  
Chicago, IL 60604

si bilaash ah (800) 621-8431, 9ka subaxnimo ilaa 4:30ka galabnimo maalmaha la shaqeeyo

Dukumeentiyo goob walba gaar u ah iyo weliba warar guud oo dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka Superfund ee EPA waxaa laga heli karaa meelahan kaydiya macluumaadka:

Green Institute  
2801 21<sup>st</sup> Ave. S., Suite 100  
Minneapolis

Minneapolis Public Library  
(Maktabadda Dadweynaha ee  
Minneapolis)  
East Lake Branch  
2727 E. Lake St.  
Minneapolis

Sustainable Resources Association  
(Ururka Ilaha Waara)  
1916 Second Ave. S.  
Minneapolis

Web: [www.epa.gov/region5/sites/cmcheartland/](http://www.epa.gov/region5/sites/cmcheartland/)



Region 5  
Office of Public Affairs (P-19J)  
77 W. Jackson Blvd.  
Chicago, IL 60604

**GOOBTA XAAFADDA SOUTH MINNEAPOLIS:  
Hawlaha Qayb ururinta Gugaa Dib loo Bilaabayaa**